

Newborn Screening Propel

Newborn Screening (NBS) Propel waxay muhiimada saaraysaa kor u qaadista nidaamka baaritaanka ilmaha dhashay ee dhammaan dhallaanka reer Minnesota iyo qoysaskooda. Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (Minnesota Department of Health [MDH]) iyo bahwadaagteeda ayaa hirgeliyay kooxaha maamulay diiraddana saaray sahanka si ay wax badan uga bartaan waayo-aragnimada waalidiinta iyo daryeelayaasha ee nidaamka baaritaanka dhallaanka. Waalidiinta iyo daryeelayaasha dhallaanka iyo carruurta laga helay faayruska ku faafa taabasha tooska ah ee dareeraha jirka ee lagu dhasho [cytomegalovirus \(www.health.mn.gov/CMV\)](https://www.health.mn.gov/CMV) (CMV) iyada oo loo marayo baaritaanka dhallaanka ayaa lagu martiqaaday inay ka qaybqaataan. Dhaqaatiirta la shaqeeya dhallaanka iyo carruurta qaba cudurka lagu dhasho ee CMV ayaa sidoo kale lagu martiqaaday inay bixiyaan fikrado inta lagu jiro wareysiyada muhiimka ah.

Ururinta sahanka ayaa la soo gabagabeeyey. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad heshay sahan oo aadna doonayso inaad bixiso jawaab celin, fadlan la xiriir health.cyshn@state.mn.us. Kooxaha diiradda saaraya qoysaska waraysidana la yeelanaya dhaqaatiirta ayaa soo gabagabeeyay xog ururinta. Waad mahadsan tihiin dhammaan intiinii ka qaybgashay!

Mashruucaan waxaa lagu maamulayaa maal gelinta federaalka oo ka timid [Division of Services for Children with Special Health Needs NBS Propel Awards \(https://mchb.hrsa.gov/about-us/our-offices-divisions/division-services-children-special-health-needs-dscshn/dscshn-awards-2023\)](https://mchb.hrsa.gov/about-us/our-offices-divisions/division-services-children-special-health-needs-dscshn/dscshn-awards-2023).

Waxaan helay warqad si aan u buuxiyo xog uruurinta. Ma tahay in aan ka qaybgalo?

Ururinta sahanka ayaa la soo gabagabeeyey. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad heshay sahan oo aadna doonayso inaad bixiso jawaab celin, fadlan la xiriir health.cyshn@state.mn.us.

Sidee ayaad ku hesheen xogtayda xiriirka?

Barnaamijka [Newborn Screening Program \(www.health.state.mn.us/people/newbornscreening\)](https://www.health.state.mn.us/people/newbornscreening) (Baaritaanka Ilmaha Dhashay ee MDH) ayaa kasoo qaataa isbitaallada iyo rugaha caafimaadka dhallaanka iyo carruurta laga helay in ka badan 60 xanuun oo ku jira liiska baaritaanka ilmaha dhashay, uuna ku jiro xanuunka CMV ee lagu dhasho. Waxaan adeegsanaa xogta aan soo qaadno si aan u ogaano haddii carruurta iyo qoysaskoodu helaan taageerada khayraadka ay doonayaan ayna u baahan yihiin.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan xog uruurinta, fadlan ka eeg [Su'aalo & Jawaabo ku saabsan Xog-ururinta \(www.health.state.mn.us/people/childreneyouth/ncfu/dataqa-som.pdf\)](https://www.health.state.mn.us/people/childreneyouth/ncfu/dataqa-som.pdf).

Yaan la xiriirayaa haddii aan su'aalo qabo?

Fadlan la xiriir health.cyshn@state.mn.us ama wac 651-201-3650 si aad u hesho xog dheeraad ah.

Funding acknowledgement

NEWBORN SCREENING PROPEL

Maamulka Kheyraadka iyo Adeegyada Caafimaadka (Health Resources and Services Administration [HRSA]), Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (Department of Health and Human Services [HHS]) ayaa taageero maaliyadeed u fidiyay mashruucan. Abaalmarintu waxay bixisay 95% wadarta guud ee kharashaadka taasoo dhan \$345,000. Qoraaga ayaa leh nuxurka qoraalka. Waxa laga yaabaa inaysan ka tarjumayn siyaasadaha HRSA, HHS, ama Dowladda Maraykanka.

Minnesota Department of Health
Children & Youth with Special Health Needs
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
800-728-5420
health.cyshn@state.mn.us
www.health.state.mn.us

February 2026